

ICRC DA SOOMAALIYA

Janaayo ilaa Disember, 2014

XAQIIQOYINKA IYO TIROOYINKA

SUGNAANTA DHAQAALAHA



Ku dhowaad **684,000** qof ayaa ka faa'idaystay gargaarka deg degga ah. Caawimadaasi waxay isugu jirtaa cunno qaybin, dib ugu celinta xoolihii wayda ahaa ee abaarta laga gaday, iyo qaybinta jawaanadda ciidda lagu guro ee lagu xoojinayey jiinka webiga.

In ka badan **956,000** qof ayaa ka faa'idaystay barnaamijyo nololsha, kuwaasoo lagu bixinayey gargaar lacageed iyo taageero dhanka beeraha ah.

DHOWRISTA



4,600 dad gaarayaa ayaa la gaarsiiyey adeegyo la xiriira xabsiyada, adeegyadaas ayaa waxaa ka mid ah booqashooyinka xabsiyada iyo qiimaynta xaaladda maxaabiista iyo xaqiijinta in maxaabiista loola dhaqmo si aadananimada ah oo sharaf leh. Tababaro xagga xirfadda ah iyo dayir lagu sameeyey xabsiyadda ayaa la fuliyey.

CAAFIMAADKA



Si kor loogu qaado daryeelka caafimaadka in ku dhow **422,000** qof ayaa ka faa'idaystay dawo loo qaybshay isbitaaladda, xarumaha dhaqancelinta naafada iyo kor u qaadida xirfada shaqaalaha caafimaadka.

DIB U SOO CELINTA XIRIIRKA



Tiro ka badan **67,000** qof ayaa lagu caawiyey inay dib ula xiriiraan qaraabadii, iyadoo ku suura gashay Dhanbaalada Laanqayrta Cas, taleefanada iyo barnaamijka baafinta ee ka baxa laanta afka Soomaaliga ee BBC ayna ka mid tahay magacyadooda in laga sii daayo barnaamijka baafinta ee Laanta Af Soomaaliga ee BBC-da.

BIYAHA IYO DEEGAANKA



In ka badan **256,000** qof ayaa fursad u helay inay helaan ilo biyo iyo xaalad caafimaad oo wanaagsan.

XEERKA CAALIMIGA EE AADANANIMADA

295 sarkaal ayaa helay macluumaad ku saabsan Xeerka Caalamiga ee Aadananimada iyagoo ka qeyb galay tababaro ku saabsan Hab-dhaqanka colaadaha

